Caawinaada Adayda Dyslexia Qaba

Waa Maxay Dyslexia?

Dyslexia waa cilad waxbarasho oo si gaar ah ula xiriirta dhanka garashada saxda ah ee hikaadinta, qorista iyo macnaynta ereyada. Dhibaatadan ayaa inta badan waxaa asal u ah cilad xaga fahamka iyo isku xirka hadalka ah oo culays ka dhigaya kala saarista iyo raacida tilmaamaha muhiimka ah ee fasalka. Arintan ayaa dib u dhac ku noqon karta koritaanka awooda wax akhriska iyo isku xirka macnaha guud ee qoraalka iyo kobaca aqoonta guud ee ardayga

Qaabka Tijaabada Ogaanshaha

Maamulka Iskuulada Bulshada Hopkins, qiimeynta FastBridge waxa uu u isticmaalaa in lagu qaymeeyo xaalada ardayda heerarkooda sida hoos ku qoran:

Dugsiga barbaarinta/ *Kindergarten* - Fasalka 1: Dhammaan ardayda waxaa lagu qiimeeyaa deyrta/ *fall* iyo gu'ga/ spring. Ardayda aan gaarin heerka bartilmaameed ah xilga dayrta waxaa dib loo qaymeeyaa xiliga qaboobaha/*winter*. Fahamka codka, iskuxirka iyo macne samaynta, iyo faseexnimada (xiliga gu'ga fasalka 1) ayaa diirada lagu saarayaa qiimayntan.

Fasalada 2-3: Dhammaan ardayda waxaa tijaabo qiimayn ah lagu sameeyaa xiliyada deyrta iyo gu'ga, iyadoo qiimayntan lagu ogaanayo heerka saxda ah ee hadalka iyo qoraalka. Ardayda lagu ogaado tijaabadan in ay ka hooseeyaan heerka caadiga ah ee caawinaada u baahan waxaa arintooda dib loo qaymeeyaa xilliga qaboobaha/ *winter* ka.

Fasalada 4-6: Dhammaan ardayda waxaa tijaabo qiimayn ah oo xaga hadalka ah lagu sameeyaa xiliyada dayrta, iyadoo qiimayntan lagu ogaanayo heerka saxda ah ee hadalka. Ardayda lagu ogaado tijaabadan in ay ka hooseeyaan heerka caadiga ah ee caawinaada u baahan waxaa arintooda dib loo qaymeeyaa xilliyada qaboobaha/*winter* ka iyo xagaaga/*spring.*

Tijaabooyinka *FastBridge* laguma ogaado *dyslexia.* Waa talaabooyinkeena koowaad ee la qaadayo si loo garto ardayda u baahan in dhinacyo kale oo dhanka akhriska ah laga caawiyo.

Tallaabooyinka xiga waxaa ka mid noqon kara qiimeyn lagu sameynayo:

- Fahamka qaabka dhawaaqa Iyo falcelintiisa
- Isku xirnaanta Iyo micnesamaynta
- Taariikhda qoysaka - Ma jiraan xubno qoyska ka mid ah oo qaba dyslexia?
- Ku dhawaaqida degdega ah/ *Rapid Automatized Naming-RAN* (waxaa la bilaabayaa- xilliga deyrta 2019)
- Muhimada macalimiintu ay siinayaa Dyslexia (waxaa la bilaabayaa- xilliga deyrta 2019)
- Ka warhaynta iyo la socodka xaalada ardayda inta ay fasalka joogaan.

Ogaysiinta Waalidka

Natiijada qaymaynata waxaa waalidka loogu sheegaa kulanka macalimiinta iyo waalidka ama kulan kale oo ay yeeshaan waalidka iyo macalinka fasalku. Kulankaas waxaa kale oo looga hadlaa caawinaada akhriska ee uu ardaygu helayo.

Wax ka Qabashada Hore ee Muhiimka ah

Qaababbka ka hortaga ee Hopkis laga isticmaalo waxaa ka mid ah:

- **PRESS (Heer Wanaagsan wax u Akhrinta Waqtiga skuulka/ *Path to Reading Excellence in School Sites***) - Wacyigelinta iyo fahmida micnaha jumladaha, codadka, faseexnimada codka, iyo habka micne muujinta.
- **SIPPS (Fahamsiinta Qaabka Gudbinta ee Jumladaha iyo macnasamynta erayada/ *Systematic Instruction in Phonological Awareness, Phonics, and Sight Words*)** - Qaab dhismeedka habka 'Orton-Gillingham' ee wax aqrinta. Tilmaamo cad oo ku saabsan wacyiga iskuxirka, codka, iyo micnaha erayada iyadoo adeegsanaya qaab dareen muujin ah. Kala-goynta, isku-darka, laxanka, iska dabadhaca dhawaqa hikgaada, ereyada aragga iyo guud ahaan habka nuxur u samaynta hadalke ee loo muujiyo qaabab kala duwan iyo iskuxirnaanta qoraalka.
- **KPALS/PALS (Ka Caawinta Habka Waxbarashada/*Peer Assisted Learning Strategies*)** -Ogaanshaha iyo caawinta ardayda kindergartenka iyo fasalkja koowaad si arintooda waqti munaasib ah wax looga qabto. In ay ardaydu maqlaan oo ay gartaan dhawaaqyada, ku dhawaaqaan ereyada, iyo barashada qaabka wax muujinta ee ardayda fasalka koowaad. Waxaa kale oo ay ardaydu bartaan aqoonsiga codadka, kala saaridooda eayada iyo garashada qaybaha jumlada qoraalka.

La Socodka Isbadalada

Ardayda hela taageerada wax qabadka waxaa lala soconayaa isbadalada ay sameynayaan. Haddii ardaygu sameeyo horumar, waxaan ku sii wadaynaa caawinaada ilaa ardaygu uu ka gaaro heerka ardayda kale ee fasalkiisa. Haddii ardaygu uusan horumarin sameynayn, ardayga waxaa loo sameyn karaa caawin kale oo noocii hore ka duwan. Qiimeynta lagu sameeyo xaaladiisa iyo habka FastBridge ayaa lagu diiwaangeliyaa isbadalada ardayga mudada la caawinayo oo dhan.

U Gudbinta Waxbarashada Khaaska ah

Dhamaan ardayda leh astaamaha *Dyslexia* uma baahna adeegyada waxbarashada gaarka ah. Ardayda aan samayn isbadal horumar ah labada waji ee ugu horeeya caawinta loo fidiyo, waxaa laga yaabaa in loo gudbiyo qayb kale oo si gaar ah arintooda u qaabilsan si ay si ay go'aan ugu gaarto xaaladooda. Waxaa laga yaabaa in ay qaybtaasi go'aan ku gaarto in qaymaynta ardaygu in uu si toos ah u qaato waxbarashada khaaska ah in laga dhigi talaabada ku xigta ee la qaadayo. Maamulka waxbarashada ee degmadu si toos ah go'aan ugama gaari karo in uu ardaygu qabo dyslexia iyo in kale. Waxaan si gaar ah ula soconaa heerka ardayda iyo qiimeyntooda wax akhriska ee muujinaysa baahidooda in la siiyo tilmaamo waxbarasho oo gaar ah, qaabab kale oo waxbarid.

Degmooyinka iskuulada dadweynaha si rasmi ah uma ogaan karaan Disleksiya. Waxaan si dhow ula soconaa waxqabadka ardayga iyo shaashadda akhriga walaacyada tilmaamaya baahida loo qabo tilmaam dhammaystir ah, habab waxbarasho oo kale, ama adeegyo takhasus leh.

Xaqiijinta Dyslexia

Waalidka ardayda in ay qabaan *Dyslexia* meelo kale laga soo ogaaday, waa in ay macallinka fasalka la socodsiiyaan xaalada ardayga, isla markaana ay la wadaagaan macalin wixii macluumaad dheeri ah ee qayb ka qaadanaya sida ardayga loo caawinayo oo ay ay ka mid noqon karaan natiijada qiimeynta la sameeyay wixii talooyin ah ee laga siiyay. Macallinka fasalka ayaa macluumaadkan u keeni doona kooxda Kooxda Caawinta Ardayda ee dhismaha si loo tixgeliyo. Kooxda ayaa la shaqeyn doonta waalidka si ay u baaraan ilaa xadka dyslexia ay saamayso ardayga waxqabadkiisa ee dhanka aqrinta. Waxaa kale oo kooxdu go'aamin doontaa talaabooyinka xiga ee la qaadayo. Tallaabooyinkan waxaa ka mid noqon kara: qiimeyn dheeri ah, joogitaankiisa fasalka oo waxyaabo dheeri ah ardayga loo sameeyo, ku darista mid ka mid ah waxqabadyada laga heli karo goobta, ama ogaanshaha in aan adeegyo dheeraad ahba aan loo baahnayn. Waalidka waa la ogeysiin doonaa natiijooyinka qiimeynta kooxda, waxaana la hubin doonaa in uu waalidku ogolyahay inta aan wax kale loo qaban.